



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA & LATALINTA
ARRIMAHA SHARCIGA EE TAYO
MUQDISHO - SOOMAALIYA



جمهورية الصومال الفدرالية
مكتب تيو لتوثيق العقود
والإستشارات الشرعية
مقديشوا - الصومال



SHARCIGA DHISMAHA SHIRKADDA
(FEYTE GENERAL TRADING COMPANY)



MUQDISHO-SOOMAALIYA

2023

MASAWIRKA MILKIILAHA 1

MAHAD MAXAMUUD CILMI



MASAWIRKA MILKIILAHA 2

AWEYS MAXAMUUD CILMI



MASAWIRKA MILKIILAHA 3

KHALIIF MAXAMUUD CILMI



UJEEDO:- DHISID SHARCI SHIRKADDA FEYTE GENERAL TRADING COMPANY.

Maanta oo ay taariikhdu tahay **22/07/2023**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

.1-MAHAD MAXAMUUD CILMI, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna W.A.L 22393. Kana Soo baxday Déhoose Ee Muqdisho Ahna Gudoomiyaha Shirkada.


2-AWEYS MAXAMUUD CILMI, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Warqada Sugnanta No. 295401. Kana Soo baxday D/hoose Ee Muqdisho Ahna Gudoomiye Ku xigenka Shirkada.

3-KHALIIF MAXAMUUD CILMI, Somali ah, Degan Muqdisho, Lehna Somali Passport.l.r P01054157 Ahna Xubin.

Mudanayaasha kor ku xusan ayaga oo caafimaad qaba, caqligoodu taam yahay, cid heshiisnaan ku qasabtayna aysan jirin qowl iyo ficilba, waxay i weeydisteen in aan u qoro heshiis ku saabsan dhismo sharci Shirkadeed, waxeyna ka kooban tahay qodobada hoos ku qoran:-

QODOBKA 1-AAD

**MAGACA IYO ASTAANTA SHIRKADDA
MAGACA FEYTE GENERAL TRADING COMPANY.**



QODOBKA 2-AAD

MUDADA JIRITAANKA SHIRKADDA

Mudada Shirkaddu ay jirayso waa muddo 100 sano ah oo laga bilaabo malinta qoralkaan la canshuuro laguna qoro buugga shirkadaha Maxkamada Gobolka Banaadir, hase yeeshee mudadaas waa la kordhin karaa waana la baabi'in karaa waa haddii loo baahdo.

QODOBKA 3-AAD

RA'SUMAALKA SHIRKADDA IYO SIDA LOO KALA LEEYAHAY.

- Raa'sumaalka Shirkadda waa \$15,000 (Shan iyo Tobankun oo dolarka Marekanka). Waxaana ku talagalka Shirkaddu yahay in Raa'sumaalka shirkadda waa la kordhinkaraa ayada oo loo marayo in sheerer loo furo maalgashadayaasha Cusub.

MAGACA	LACGTA	BOQOLEY
MAHAD MAXAMUUD CILMI	\$5,000	33.3%
AWEYS MAXAMUUD CILMI	\$5,000	33.3%
KHALIIF MAXAMUUD CILMI	\$5,000	33.3%
GUUD:-	\$15,000	100%

**QODOBKA 4-AAD
UJEEEDADA SHIRKADDA**

- Ka Ganacsiga Miraha Beeraha & Xoolaha
- Gudashada Howl kasta oo la xiriirta maalgelinta dalka.
- Abuuridda dakhli Cusub oo wax looga qabanayo shaqa la'aanta dalka ku baahsan
- Fulinta Mashaaricda Maalgelinta la xiriirta iyo hormarinta dalka
- Keenida Farsamo Cusub oo ku haboon duruufaha dalka.
- In ay qayb wayn ka qaadata dhisidda dhaqaalaha iyo horumarka bulshada Somaliyeed
- In ay abuurto ila dhaqaale iyo adeegyo ay ka faa'idaystaan Bulshada qeybaheeda kala duwan.

**QODOBKA 5-AAD
XARUNTA SHIRKADDA**

Xarunta Shirkadda waa Magaalada Muqdisho waxayna xafiisyo iyo laamo ku yeelan kartaa dhammaan dalka gudahiisa iyo dibaddiisaba.

**QODOBKA 6-AAD
XISAABTA SOCOTA EE SHIRKADDA**

Waxaa xisaabta socota ee shirkadda la xirayaa bisha Sako ee sanad walba.

**QODOBKA 7-AAD
FAA'IIDADA IYO QASAARAH Shirkadda**

- Faa'iidada ama qasaaraha shirkadda waxaa loo qeybsanayaa qeybo isla'eg oo la xiriira qofku saamiga uu ku leeyahay shirkadda
- Waxey Sadaxdaan Milkiile Leeyihiin 30% Faiidada guud ee shirkada hatideeda .
- Sakada Waxaa dhiibaya Shirkada Xitaa Saamilaha Sakadiisa.

**QODOBKA 8-AAD
MAAMULKA SHIRKADA**

Gudoomiyaasha Shirkadda Waa 1-MAHAD MAXAMUUD CILMI 2-AWEYS MAXAMUUD CILMI iyo 3- KHALIIF MAXAMUUD CILMI oo ah (Xubin) Waxey Awood Buuxda U Leeyihiin Maamulka Guud Ee Shirkadda iyo kutasarufka hantida shirkada, Sida In ay Lacag Ku Shubi Karaan si kalili ah Kana Saari karaan si kalili ah Bangiyada Dalka Iyo Dibadaba, Saxiixi Karaan Jeegaga Shirkada Rahana Gelin Karaan Hantida Shirkada , Kana Saari Karaan Una Soo Gadi Karaan Una Soo Iibin Karaan Shirkada Hantida Maguurtada Iyo Guurtada Sida Dhulalka , Guryaha , Baaburta Iwm , Lana Geli Karaan Heshiisyo Iyo Macaamilaad Shirkado Kale Iyo Hayadaha Dowliga Ah Iyo Kuwa Aan Dowliga Aheynta Oo Ay Dani Ugu Jirto Shirkada .

**QODOBKA 9-AAD
TIRADA DADKA AA'SAASAH SHIRKA**

- Shirkadda waxaa aa'saasay 3, qof ee sare ku xusan.
- Maamulka sare ee shirkadda (board of directors), waxaa uu ka kooban yahay 3,xubin oo ah milkiilayaasha, waana hay'adda ugu sareysa shirkadda, ayaga ayaana dooranaya xubnaha fulinta (executive officers) ee wadaya howl maalmeedka shirkadda.

- Xeer hoosaadka shirkadda ayaa lagu cadeynayaa awoodaha howl wadeenada fulinta waxaana soo saaraya xeer hoosadyada aa saasaha shirkadda. Waxa ayna xeerhoosaadyadu hoos imaanayaan xeerka guud ee shirkadda.
- Qofkale Kama noqon karo shirkada milkiile oo aan eheen Sadaxda Milkiile Ee Sare Ku xusan

QODOBKA 10-AAD

FADHIYADA HOWL-WADEENNADA SHIRKADDA

Fadhiga Howl-wadeenada shirkadda waxaa isugu yeeri karaa Guddoomiyaha shirkadda iyo ciddii kale ee uu u idmado waana in lugu war galiyaa xubnaha shirkadda 07 cisho ka hor meesha shirku ka dhacayo loona sii cayimo oo loo sii sheego.

QODOBKA 11-AAD

CODKA SAAMILEEYDA

- Codka saamileyda shirkadda waxaa loo raacayaa laguna qaadanaayaa hal-dheeri haddii ay isla ekaadaan oo ay is garab dhacaan xubnaha shirkadda ee wax dooranaya waxaa loo raacayaa dhinaca guddoomiyuhu la jiro taas oo noqoneysa aqlabiyadda saxda ah.
- Waxaa Jiri kara Saamile Aan Wax Cod ah aan ku leheen Shirkada .

QODOBKA 12-AAD

ISTICMAALIDDA ASTAANTA SHIRKADDA

Astaanta Guud ee Shirkadda waa Astaanta kor ku dhegagan wixii aan loo isticmaalin waxaa loo arkayaa inaysan ka tarjumeyn shirkadda.

QODOBKA 13-AAD

XUBINTII GEERIYOOTA AMA BUKOOTAA

- Xubinta geeriyoota oo ka mid ah hantilayaasha shirkadda waxaa saamigiisa xaq u yeelanaya dhaxaltooyadiisa sharciga ah, oo ay soo caddeyso maxkamad, kadib waxay soo magacaabanayaan wakiil haddii ay ogolaadaan in shirkadda ay kasii mid ahaadaan, sidoo kale haddii ay dalbadaan in saamigooda la baxaan sanadka xisaabeedka markii uu dhamaado ayaa loo bixinayaa saamigooda.
- Qof hadii uu bukoodo ama uu geeriyoodo waxaa dhaxal sugayaasha helayaan 10% ilaa ay shirkada ay jirayso. Waana hadii ay Xoola ugu jiraan Shirkada.
- Qofkaas Buktada ama Geerida uga baxay haddii shirkada ay ayada goaan sato in ay dhaxal sugayaasha ku doorato qof in ay soo galiso booskaas laga baxay waxay ka go'daa shirkada
- Haddii ay Meshka kabaxaa sadaxdooda dhaxal sugayaasha midkii ugu horeeyay ayaa shirkada maamulaaya.

**QODOBKA 14-AAD
KA BIXITAANKA SHIRKADDA**

- 1-Inuu qoraal ku soo codsado ka bixidda saamileyda shirkadda.
- 2-Haddii uu ku xadgudbo xeerka iyo nidaamka u degsan shirkadda.
- 3-Haddii ay ku caddaato inuu ku takri falay hantida ama magaca shirkadda.
- 4-Xubintii lumisa ka mid noqoshada saamileyda waxaa loo celinayaa xaquuqdiisa faa'ido iyo khasaaro waqtiga xisaab xirka.

**QODOBKA 15
HESHIISKAN WUXUU KA KOOBAN YAHAY
15 QODOB 1 COVER , 5 BOG IYO 2 NUQUL OO ORJINAAL IYO KOOBI AH.**

SAXIIXA MILKIILAYAASHA

MAHAD MAXAMUUD CILMI,

MAHAD

AWEYS MAXAMUUD CILMI

Aweys

KHALIIF MAXAMUUD CILMI

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP.762/T.P.N/23, Tr. 22/07/2023, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo", Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan in ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa waxaan halkan ku caddeynayaa in heshiiskan dhismaha sharciga Shirkadda ee kor ku xusan uu yahay mid sax ah oo waafaqsan shareecada islaamka iyo shuruucda madaniga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, islamarkaana Ayna saxiixeen milkiilayaasha Shirkadda Nootaayaduna waxey hubisay magacyada in ay yihiin kuwii dhabta ahaa ee lahaa saxiixyada kor ku xusan, waxaana lagu qoray Diiwaanka guud ee Nootaayada.

NOOTAAYAHA

Dr. Maxamed C/Ilaahi Maxamed "Max'ed Nootaayo"


DOWLADDA HOOSE
EE MUQDISHO



MUNICIPALITY
OF MOGADISHU

KAARKA AQOONSIGA

Lambar:
22393



Magaca.....: MAHAD
Aabaha.....: MAXAMUUD
Awowga.....: CILMI
Naynaas.....: MALAHAN
Goobta
Dhalashada: MUQDISHO
Sanadka.....: 02-Feb-1980
Jinsiyada.....: SOOMAALI

Shaqada..... GANACSADE

Astaan Gaar: MALAHAN


Hooyada: FAADUMO OSMAN CUMAR
Dheerarka : 1.7

Taariikhda Labixiyey:
12-May-2018 12:00:00 A

Duqa Magaalada:



Adnan Sam



Aqoonsigan waxaa ogolaatay Dowladda Hoose ee Muqdisho. Qofkii hela
aqoonsigaan, fadlan guddoonsii xafisyada Dowladda Hoose ee Muqdisho
kan kuugu dhow.



DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU
WARQADDA SUGNAANTA
Certificate of Identity Confirmation

DUQA MAGAALADA MUQDISHO WUXUU CADEYNAYAA IN SAWIRKA IYO SUUL SAARIDDA HOOS KU TILMAAMAN UU YAHAY QOFKA HOOS KU XUSAN:

(The Mayor of Mogadishu hereby certifies that the person whose picture and thumb print appears below has the following details:)

MAGACA Full Name	AWEYS MAHAMUD ELMI
TAARIKHDA DHALASHADA Date of Birth	21-Mar-1972
GOORTA DHALASHADA Place of Birth	MOGADISHU
NUMBERKA KAARKA AQQONSIGA ID number	295401
JINSI Gender	Male
XAALADDA GUURKA Marital Status	Married
DEGGAN Address	Warta-sabada
MAGACA HOYADA Mother's full Name	SIRAD ALI NOR
TAARIKHDA LA BIXIYAY Date of Issue	26-July-2022
SHAQADA Occupation	GANACSADE



Right Thumb Print

Duqa Magaalada ee Muqdisho
Mayor of Mogadishu
Cumar Maxamuud Maxamed

(Signature of Cumar Maxamuud Maxamed)





FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 22/07/2023

Aniga oo ah **Sayid-Cali C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Aweys Maxamuud Cilmi** Dukumiintiga **Original** Caddeynta **Rep No. 762/W.P.N/23, Tr. 22/07/2023**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Loo Caddeeyaha	Aweys Maxamuud Cilmi
Taariikhda Caddeynta	22/07/2023

Loo Caddeeye: Aniga oo ah **Aweys Maxamuud Cilmi**, Leh Tel No. **0619631483**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Caddeynta faah faahinteedu Sare ku cadahay.

Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Sayid-Cali C/llaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Aweys Maxamuud Cilmi